

Warsaxafadeed GSD

War Saxaafadeed

Ka ganacsiga jirka gabdhaha da'yarta Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa qurbaha ka yimid:

Golaha Qurbajoogta Soomaaliyeed (GSD) waxay ku baaqaysaa in fal danbiyeedkan la baaro

1<sup>da</sup> Oktoober 2018

Waxaa runtii naxdin iyo walaac leh hadalka kasoo yeeray Gudoomiyaha Ururka Haweenka ee Gobolka Banaadir, Marwo Jawaahir Baarqab.

Intii muddo ahba waxaa soo kordhayey wararka ka waramaya tahriibinta iyo ka ganacsiga jirka gabdhaha Soomaaliyeed ee da'da yar, khasatan kuwa qurbaha ka yimid ee ku sugan magaalada Muqdisho. Falalkan oo ah runtii kuwo ka dhan ah diinteena, dhaqankeena, akhlaaqda suuban iyo xuquuqda bini'aadanimada ee gabdhaha.

Gudoomiyaha Golaha Qurbajoogta Soomaaliyeed (GSD), Jawaahir Daahir (BEM) waxay tiri: "Waxaan aad usoo dhaweynaynaa sida mas'uulnimada iyo geesanimada leh ee ay Gudoomiyaha Ururka Haweenka Gobolka Banadir ugu istaagtay inay arrintan foosha xun si cad uga hadasho, uguna soo bandhigto dadwenayaha iyo saxaafaddabba. Waxaan ka codsanaynaa Gudoomiyaha Gobolka Banadir, ahna Duqa magaalada Muqdisho, Cabdiraxman Cumar Cusman 'Engineer Yarisow' iyo Dawladda Fedraalka Soomaaliyeedba inay arrintan si degdeg ah u baaraan hadday jirtana looga qaado talaabo deg-deg ah oo waafaqsan sharciga".

Waxaan marnaba la aqbali karin inaan annagoo mujtamac Muslim ah falalkan foosha xun ee ka ganacsiga gabdhaha ay noqoto wax layska indha tiro asagoo ka dhacaya magaaladii xudunta u hayd waddankeena. Waxaan aragnay sanadahii la soo dhaafay ceebtii xumayd ee saamaynta ku lahayd AMISOM iyo kuwii la shaqaynayay iyo sidii gabdhaheenii u noqdeen wax aan xuquuq lahayn ee lacag raqiisa lagu kala gato, qaarkoodna lagu kufsado.

Jawaahir Daahir (BEM) waxay ku dartay: "Gudoomiyaha Gobolka Banadir, ahna Duqa Magaalada Muqdisho, Dawladda Fedraalka Soomaaliyeed iyo hay'adaha qaabilsan amniga waa inay arrinta muhimad gaar ah siiyaan, guddi madax banaanna loo magacaabo, lana soo baara ayadoo hadafku yahay in gabdhaheena xuquuqdooda, sharaftooda iyo cisigooda lasoo celiyo korna laga yeelo".

Waxaan farriin adag u diraynaa inta ku mashquulsan arrimahan foosha xun inay ka waantoobaan kana fekeraan in iyagaba hooyo dhashay, lagana yaabo inay gabdho la dhasheen ama dhaleen.

Qofna uma quuri karo in falalkan oo kale ay ku dhacaan dumarka qosykiisa kasoo jeeda. Sidaa daraadeedna waa inay ula dhaqmaan gabdhaha kale siday jecel yihiin in loola dhaqmo gabdhahooda.

Waxaan taageeraynaa codka Gudoomiyaha Ururka Haweenka ee Gobolka Banaadir, Marwo Jawaahir Baarqab iyo gabdhaha kale ee Soomaaliyeed iyo hay'aha xuquuqda gabdhaha u dooda si arrinta si wada jira wax looga qabto, loogana hortago tahriibinta iyo ku xadgudubka xuquuqda gabdhaha Soomaaliyeed.

Waxaan u baahanahay inaan aragno ficil deg-deg ah oo ka yimaada Dawladda Soomaaliyeed.

[DHAMAAD]



FIIRO GAAR AH:

1. Golaha Qurbajoogta Soomaaliyeed waa ururka ugu weyn ee kulmiya qurba joogta Soomaaliyeed, asagoo ay ka tirsan yihiin in ka badan 100 xubnood oo adduunka dacaladiisa kala jooga.
2. Wixii faahfahin dheeraad ah, fadlan kala xiriir:  
Golaha Qurba Joogta Soomaalida (GSD)  
27 Old Gloucester Street  
London WCN1 3AX  
United Kingdom  
+ 44 7375051582
3. Ama khadka internetka nagala soco  
<http://gsd.so/>  
<https://www.facebook.com/GlobsomDiaspora/>  
<https://twitter.com/globsomdiaspora?lang=en>  
<https://www.youtube.com/channel/UCI9PTukIzvYgyUnNswZB4vw>